

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 22/01/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- MOHAMED AHMED YOUSUF, Somali ah, Ku Dhashay: Somalia, Sanadkii: 10/09/1973, Sita: Norway Passport, Lr. CCC871240	LA WAKIISHE:- ABDISHAKUR AHMED YUSSUF, Hooyo: Faadumo Xuseen Xirsi, Somali ah, Degan Hodan, Sita: Somali Passport, Lr. P01459514, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya
TILMAAMAHA DHULKA Dhul Banaan oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Wadajir) , Cabirka: (20X20)-M , Looto No: 048 , W.M.L: (Rep.67976/2018) , Tr. 12/05/2018, Kana Soo Baxay Nootaayaha Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble.	SOOHDINTA DHULKA Bari: dhul dad, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: Jid

B- Aniga oo ah **MOHAMED AHMED YOUSUF**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkay **ABDISHAKUR AHMED YUSSUF** una wakiishay Qaybta milkiyadda ee aan ku leeyahay dhulka naga wada dhaxeeyo Walaalkay **C/shakur Axmed Yuusuf**, in uu gadi karo, Wareejin Karo, dhisi karo, ijaari karo, Rahan u dhigi karo, kana saari karo rahanta, kuna gali karo heshiis Muraabaxo ah, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABDISHAKUR AHMED YUSSUF** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **ABDISHAKUR AHMED YUSSUF**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **MOHAMED AHMED YOUSUF**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA
MOHAMED AHMED YOUSUF

SAXIIXA LA WAKIISHAHA
ABDISHAKUR AHMED YUSSUF

M. Yousuf

Abu

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDIKARIM ISSE YUSUF

2- MOHAMED HIRSI FARAH

Abu

Abu

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1359/T.P.N/25, Tr. 22/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **MOHAMED AHMED YOUSUF** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **ABDISHAKUR AHMED YUSSUF** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: *C/laahi*



NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:-(HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNICIBALE AH). Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay Laba iyo Tobanka Bisha Shanaad, ee sanadka Labada kun toban & Sideeda. (12/05/2018.) Aniga Notaaya muqdisho Dr. Saciid Cali Cosoble, waxaa xafiiskeyga kuyaal S/Bakaaraha ee inta u dhaxaysa Shirk.D/shiil & Masjidka Abuu Hureyra iigu yimid iyaga oo soo heshiiyey ina weydiistey inaan u kala qoro heshiiskooda ujeeddada sare ku xusan dadka Soomaaliyeed ee hoos ku kala caddeynaya sidatan:-

1-) Aniga oo ah Xuseen Qaasim Yuusuf iidow, Waxaan Heshiiskan ku caddaynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyay kuna wareejiyay 1-) Maxamed Axmed Yuusuf, 2-) C/shakuur Axmed Yuusuf, Booskayga banaan ee ku yaal Xamar Degmada (Wadajir), oo aan ku milkinay W.M.L.48443/2013, Tr,22/04/2013, Kana Soo Bxaday Nootaayo Muqdisho Uuna Saxiixay Dr, Saciid Cali Cosoble, Booskaan oo cabirkiisu dhan yahay (20X20.M) Lotto Lr. (048), Soohdimihiisuna kala yihiin Waqooyi waxaa ka mara Jid, inta kalana Waxaa ka xiga dhul dad. Lehna nullo oste ku lifaaqan qarqadaan, Wuxuuna iibsadaha 1-aad ahna wakiilka iibsadaha 2-aad booskaan iiga iibshay lacag dhan USD. 35,000/\$. (Sodon iyo Shan Kun oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay), Waxaa kale oo aan caddaynayaa in booskaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anagu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla booskaan. Wixii taariikhda sare ka danbeeyana booskaan milkiyadiisa faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa canshuureedba wuxuu u wareegay 1-) Maxamed Axmed Yuusuf, 2-) C/shakuur Axmed Yuusuf.

2-) Aniga oo ah Maxamed Axmed Yuusuf, Ahna iibsadaha 1-aad, wakiilna ka ah iibsadaha 2-aad ee lagu magacaabo C/shakuur Axmed Yuusuf, Somali ah, Ku Dhashay Kariokor, Sanadkii 1986, Kii, Degan "Kenya" Hooyadiisna la yiraahdo Faadumo Macalin Xuseen, Waxaan Heshiiskan dhankayga ku caddaynaynaa in Xuseen Qaasim Yuusuf iidow, igu wareejiyay booskaan afartiisa dhinac ee kala duwan oo waxba dhimaneyn lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan ka gudoomay una gudoomay iibsadaha kale.

=SAXIIXA ISKA IIBIYAHA=
Xuseen Qaasim Yuusuf iidow.

=SAX, IIB, 1-AAD AHNA WAKIILKA IIB, 2-AAD=
Maxamed Axmed Yuusuf.

=(SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA)=

1-) C/xakiin Cumar Sh, Axmed.

2-) C/Ilaahi Xasan Cabdi.

Rep.67976/2018.

(CADDEYNTA NOOTAAYAHA)

Tr.12/05/2018.

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr.Saciid Cali Cosoble, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Xuseen Qaasim Yuusuf iidow, Somali Ah, Ku Dhashay C/buur, Sanadkii 1980, Kii, Aqoonsigiisuna wuxuu ku lifaaqan ducumintigaan, Hooyadiisna la yiraahdo Muraado Macalin Cabdulle, Ahna (iska iibiyaha), 2-) Maxamed Axmed Yuusuf, Somali ah, Ku Dhashay C/buur, Sanadkii 1973, Kii, Hooyadiisna la yiraahdo Faadumo Macalin Xuseen, oo ah (iibsatada 1-aad ahna wakiilka iibsadaha 2-aad), iyo waliba labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan. Dadkaani Soomaaliyeed ooanigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ayleeyihiin waxay heshiiskan igala saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By Madaxey.

=NOOTAAYAHA=
(Dr.Saciid Cali Cosoble)



Waa la dir. Waa
Gali yob Waana
Magac war ee
Jin yob Mhuur 15/5/20



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 25/01/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/Shakur Axmed Yuusuf** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1359/T.P.N/25, Tr. 22/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/Shakur Axmed Yuusuf
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X20
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Wadajir
Lotto Lambar	048
W.M.L	Rep.67976/2018, Tr. 12/05/2018 Ka soo baxday Nootaayo Tayo
Taariikhda Wakaalada	22/01/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/Shakur Axmed Yuusuf**, Leh Tel No. **0619998835**, Degan **Hodan** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/Shakur Axmed Yuusuf